



Diiiradda la saarayo: Jawaab celinta iyo cabashooyinka

Marka la joogo CareOregon, waxaanu rabnaa in aad adiga — xubnaheenu — yeelataan waayo-aragnimada ugu fiican ee suurtagalka ah ilaa iyo inta aanu kuu adeegayno. Jawaab celintaadu waxay naga caawisaa in aanu wax wanaajiyo. **Waa xuquuqdaada sharci in aad gudbiso cabasho, lamana kulmi doontid wax awaaqib xumo haddii aad sameyso.**

Nooca ugu badan ee cabashooyinka



Isthixgal xun oo lala
yeesho qof



Daryeel ama
adeeg liita



In wax la sugo
muddo dheer



Dhibaatada
dhanka biilka

Sida loo sameeyo cabasho ama tabasho

Haddii aadan ku faraxsanayn CareOregon, adeegyadaada daryeelka caafimaadka ama daryeel bixiyahaaga, nala soo socodsii. Magaca rasmiga ah ee tani waa gudbinta cabasho jirta “filing a grievance,” waana mid sahlan.

Telefoon ahaan

Adeega Macmiilka CareOregon ka wac 503-416-4100, khadka bilaashka ah 800-224-4840 ama TTY 711. Saacadahayaga shaqadu waa 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Isniinta-Jimcaha.

Internet-ka

Booqo [link.careoregon.org/
complaint-form](http://link.careoregon.org/complaint-form) si aad u buuxiso
Foomka Cabashada Qorshaha
Caafimaadka Oregon.

Qoraal ahaan

Cabashadaada u soo dir:
CareOregon
Attn: Appeals and Grievances,
315 SW Fifth Ave,
Portland, OR 97204

Halkan waxaa ku qoran nidaamka uu u baahan yahay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA):

- 1 Adiga, daryeel bixiyahaaga ama wakiilkaaga ayaa cabashada kuu sameyn kara. Daryeel bixiyahaaga ama wakiilkaagu wuxuu u baahan yahay oggolaansho qoraal ah si ay u sameeyaan cabasho iyaga oo kaa wakiil ah. Dooro mid ka mid ah kuwa la kala dooranayo si aad u sameyso cabashadaada.
- 2 Wuxaan ka shaqeyn doonaa in aan u xallino cabashadaada sida ugu dhakhsaha badan ee xaaladaada caafimaad u baahan tahay. Haddii aan u baahanay wax ka badan shan maalmo shaqo, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad si aanu kuula socodsiino sababta.
- 3 Wuxaan kaa doontaa muddo 30 maalmaha kaalandarka gudahood ah.

Waad ku mahadsantahay wakhtiga aad siisay si aad gacan uga geysato in aan wanaagsanaano.

Adeegyada luqadda waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).



Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.



CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee loogu talagalay xubnaheena.



Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirkha
- ▶ Iisticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Su'aalaha?

Ma haysaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan CareOregon iyo Medicaid? Ama waxaa laga yaabaa in aad jeelaan lahayd in aad noqon xubin ka tirsan CareOregon? La hadal qof kasta oo ka tirsan kooxdeena Connect to Care ama wac Adegeena Macmiilkha ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac 800-224-4840 ama TTY 711.

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

